Socialstyrelsen
THE NATIONAL BOARD OF HEALTH AND WELFARE

Somaliska
Somali

Dukumentigan waxaad ka helaysaa su'aalo iyo jawaabo ku saabsan la wareegida carruur sida waafaqsan sharciga go'aamada gaarka u ah daryeelka dhallinyarada, LVU.

## Waa maxay LVU?

LVU waa soo gaabinta sharciga Iswiidhishka ee lagu magacaabo sharciga (1990:52) oo leh go'aamo gaar ah oo ku saabsan daryeelka dhallinyarada. Sharcigu wuxuu bulshada Iswiidhishka iyadoo loo marayo dhinaca adeegga arrimaha bulshada siinayaa fursad ah in lagu badbaadiyo carruurta iyo dhallinyarada ka yar 21 jir. Laakiin caawimaadda ugu badan ee adeegga arrimaha bulshadu siiyaan carruurta iyo waalidiinta waa ikhtiyaari oo sidaas awgeed adeegga arrimaha bulshada ma u baahna inay isticmaalaan go'aan waafaqsan LVU.

## Mudo intee le'eg ayay LVU jirtay?

Sharcigan wuxuu hirgalay 1990 laakiin Dalka Iswiidhan wuxuu lahaan jiray sharciyo nidaaminaya la wareegida xannaanadda carruurta xitaa ka hor.

## Goorma ayay adeegga arrimaha bulshada u noqon kartaa suurtagal in lala wareego xannaanadda carruurta?

Go'aan ku saabsan la wareegidda xannaanadda oo waafaqsan LVU waa inuu ku salaysnaadaa inay jirto khatar muuqata oo ah in caafimaadka ama horumarka ilmaha uu dhaawacmayo. Tani waxay ku saabsanaan kartaa xaalad xun oo ka jirta guriga ama dabeecada gaarka ah ee ilmaha. Is-dirir iyo hab dhaqan xun oo ka yimi qoyska waa hal tusaale, mid kalena waa in ilmahan laf ahaantiisu is gelinayo khatar, isticmaalo daroogo ama fuliyo dembi. Hal shuruud oo kale ayaa ah in loo arko, ama in adeegga arrimaha bulshada ogyihiin, in waalidka iyo ilmuhu aanay oggolayn daryeelkan.

## Miyaa diin ay sabab u ahaan kartaa in ilmo lala wareego xannaanadda ilmaha?

Maya, diin maaha wax sabab u ah la wareegid ilmo. La wareegid xannaanadda, sida waafaqsan LVU waa inay mar walba ku salaysnaataa inay jirto khatar muuqata oo ah in caafimaadka ama horumarka ilmaha uu dhaawacmayo. Tani waxay ku saabsanaan kartaa xaalad xun oo ka jirta guriga ama in dabeecada gaarka ah ee ilmaha ay keenayso khataro.

Version 1 den 11 mars 2022

## Miyaa waalidka aan ku hadlin af Iswiidhishka heli karaan caawimaad turjubaan xilliga la wareegidda xannaanadda?

Haa, adeegga arrimaha bulshada waa inay isla sida hey'adaha dawladeed ee kale ee Dalka Iswiidhan ay isticmaalaan turjubaan haddii lala xiriirayo qof aan ku hadlin af Iswiidhish. Sidoo kale waa in la turjumo dukumentiga la qoray haddii taas loo baahdo.

## Sidee ayay u dhacdaa marka adeegga arrimaha bulshada gaaraan go'aan ah la wareegid xannaanadda ilmo? Miyaa tusaale ahaan ciidanka booliisku lug ku lahaan karaan?

Waxay ku bilaabataa in adeegga arrimaha bulshada si uun ugu war helo in qof ilmo ah u ku sugan yahay xaalad xun ama halis ugu jiro xaalad xun. Adeegga arrimaha bulshada ayaa markaas leh waajibka ah in la baaro baahida ilmahan u qabaan taageero iyo badbaadin. Hawshaas waa inay ku salaysnaataa waxa ugu fiican dhinaca ilmahan.

Haddii loo baahdo in ilmaha la badbaadiyo oo si degdeg ah meel loo geeyo, oo xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta aynan raali ka ahayn, markaas waxay adeegga arrimaha bulshada go'aamin karaan in sida ugu dhaqsida badan la wareegidda xannaanadda. Tani micnaheedu waa in loola wareego xannaanadda ilmaha inkastoo xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta aynan raali ka ahayn. Maxkmad ayaa ka dib go'aaminaysa haddii guddida arrimaha bulshada go'aankooda uu ahaado ansax. Guddida arrimaha bulshada waxay fursad u haystaan inay caawimaad ka helaan ciidanka booliiska xilliga la wareegida xannaanadda, laakiin oo keliya haddii taas loo baahdo.

Haddii xaaladu aanay ahayn degdeg, laakiin adeegga arrimaha bulshada ay sideedaba qiimeeyaan in ilmahan u baahanyahay daryeel khasab ah markaas adeegga arrimaha bulshada ayaa codsi u gudbiya maxkamadda. Maxkamadda ayaa go'aamisa markaas haddii ay jirto sabab la adeegsado xeerka LVU.

## Maxaa waalidku samayn karaan haddii xannaanadda carruurtooda lala wareego? Miyay rafcaan ka qaadan karaan? La wareegiddu ma mid ahbaa weligeedba?

Haa, waalidiinta rafcaan ayay go'aanka daryeelka khasabka ee carruurtooda ka qaadan karaan. Maxkamad ayaa mar walba go'aaminaysa haddii ilmo ay tahay in lala wareego xannaanadooda. Go'aanka maxkamadu gaarto rafcaan ayay waalidiinta ka qaadan karaan.

Ilmaha iyo xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta waxay xaq u leeyihiiin garyaqaan, taas oo micnaheedu tahay caawimaad arrimaha sharciyan taas oo ay lacagta bixiso dawladdu. Sida ugu dhakhso badan ee daryeel khasab ah aanay u jirin baahideedu markaas waa in la joojiyo. Go'aanka daryeel khasab ah waa inay ka fiirsadaan ama dib u qiimeeyaan guddida arrimaha bulshada ugu yaraan lixdii biloodba hal mar.

## Miyay jirtaa khatar ah in carruurta xannaanadooda lala wareegay laga faa'iidaysto, ama xitaa la iibiyo?

Hey'addaha dawladeed ee Dalka Iswiidhan ma iibiyaan carruurta. Khatarta in carruur meel la geeyay uu qof ka faa'iidaysto si la mid ah sida carruurta kale ayay aad u yartahay. Dhammaan carruurta meel la geeyay waa inay leeyihiin xoghayaha arrimaha bulshada u gaar ah oo ka tirsan adeegga arrimaha bulshada, qofkaas oo waajib ku ah in u la socdo xaaladda ilmaha ku sugan yihiin. Adeegga arrimaha bulshada mas'uuliyad aad muhiim u ah ayaa ka saaran in carruurta meel la geeyay aan laga faa'iidaysan.

## Maxaa jira wax sharciyo iyo badbaadin damaanad qaadaya i carruurta lala wareegay ay xaalad fiican ku sugnaadaan?

Adeegga arrimaha bulshada ayaa mar walba mas'uul ka ah in carruurta meel la geeyay ay helaan daryeel fiican. Qoysaska doonayaan in ilmaha guryahooda lagu xannaanadeeyo waa la baara waxaa baara adeegga arrimaha bulshada, tan kale Hoyga loo yaqaanno HVB waa in mar walba ruqsad ka helo Kormeerka daryeelka iyo xanaanada (IVO) taas oo ah hey'adda dawladeed ee kormeerta adeegga arrimaha bulshada.

Adeegga arrimaha bulshada waa inay xitaa si fiican ula socdaan daryeelka carruurta meel la geeyay. Sida in lala hadlo ilmaha, la booqdo meesha isaga ama iyadu ku noolyihiin, oo lala hadlo qoyska guriga haya ilmaha ama shaqaalaha iyo xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ilmaha. Ug yaraan waa in go'aanka daryeel khasab ah dib u fiirsasho iyo dib u qiimeyn ay ku samayso guddida arrimaha bulshada hal mar lixdii biloodba. Sida ugu dhakhso badan ee daryeel khasab ah aan loo baahnayn waa inuu joogsado.

Sharciga Dalka Iswiidhishka waxaa ku qoran in dhammaan dadka ogaada ama ka shakisan in ilmo ku jiro xaalad xun ay wargeliyaan guddida arrimaha bulshada. Taasi waxay khuseysaa xitaa carruurta meel la geeyay. Shaqaalaha dhinaca hawlaha ku jiheysan carruurta iyo dhallinyarada waa inay isla markiiba sameeyaan wargelin. Shaqaalaha hoyga loo yaqaanno HVB lagu hayo dhalinyarada ee arka xaalad xun iyo khataro ah dhinaca daryeelka carruur iyo dhallinyarada waxaa waajib ku ah inay isla markiiba arrintaas uga waramaan qofka mas'uulka ka ah goobta.

## Immisa carruur ay ayaa lala wareegaa xannaanadooda sanad walba gudaha Dalka Iswiidhan?

Sanadkii 2020 waxaa la gaaray go'aamo ku saabsan daryeelka khasabka sida waafaqsan LVU isu geyn 3486 carruur ah dalka oo dhan. Waxay ka kooban yihinn la wareegid xannaanadda dhakhso ah iyo go'aamo kale oo ah daryeel waafaqsan LVU.

Halka laga soo xigtay: Maamulka arrimaha bulshada tirakoobkooda rasmiga ah ee hawlaha adeegga bulsho ee carruurta iyo dhallinyarada sanadkii 2020.

## Miyaa ilmuhu xaq u leeyahay in lagu meeleeyo qoys ay isku diin yihiin?

Waa muhiim in ilmahan helo haysashada xiriirka halka uu ka soo jeedo, luqadiisa iyo dhaqankiisa. Adeegga arrimaha bulshada waa inay ugu horeyn baaraan haddii ay suurtagal tahay in ilmahan la geeyo guri ka tirsan shabakada ku xeeran ilmahan. Waxa ugu fiican ilmahan waa in mar walba la eegaa. Adeegga arrimaha bulshada mas'uuliyad ayaa ka saaran inay daryeelkan u qaabeeyaan qaab horumarinaya ilmahan xiriirkiisa qoys iyo dad micno weyn u leh ilmahan, iyo la xiriirka guriga.

## Miyuu jiraa nidaam ku xusan in ilmaha lagu meeleeyo isla magaalada qoyskiisa?

Adeegga arrimaha bulshada waa inay isku dayaan inay ilmaha geeyaan meel u dhow guriga si aanu u istaagin xiriirka lala leeyahay dhinaca guriga. Ka sii fiican haddii lagu meeleeyo iska degmada. Laakiin waxaa jira xaalado markaas oo aanay u fiicnayn ilmahan in la geeyo meel u dhow waalidka, tusaale ahaan haddii ilmahan loola wareegay sababtoo ah xadgudub uga yimi dhinaca qoyska.

## Shuruudo noocee ah ayaa lagu xiraa qoyska ilmaha xannaanadooda loola wareegay lagu meelayn doono?

Qoysaska ilmaha lagu meelayn doono waa inay leeyihiin awoodo ay ilmaha ku siin karaan daryeel amaaan leh, sugan, ujeedo leh iyo raad ah sii waarid. Tan kale Qoyska guri haynaya ilmo waa inay xitaa leeyihiin awoodo ah in ilmaha laga haqabtiro baahiyihiisa. Waa adeegga arrimaha bulshada kuwa baaraya in qoysaska guri ilmo haynaya ee suurtagal ah ay buuxiyaan shuruudahan oo waa inay xitaa si fiican ula socdaan daryeelkan.

## Immisa la siiyaa qoysaska guryahooda ilmaha ku xannaanadeeyo?

Tani waxaa la go'aamiyaa iyadoo la tixgelinayo ilmo kasta baahidiisa hawlo iyo nooca hawsha looga baahan doono isla guriga qoyska haynaya ilmo. Waxaa jira talooyin qaran dhinaca gunnada kuwaas oo Gobolada iyo degmooyinka Dalka Iswiidhan (SKR) ay daabacaan, iyagu waa ururka dhinaca degmooyinka.

## Goorma ayaa ilmuhu dib ugu soo noqdaa qoyskiisa? Ma loo oggolyahay ilmaha inuu ka mid ahaado go'aaminta arrintan?

Sida ugu dhakhso badan ee daryeelka LVU aan loo baahnayn waa inuu joogsado. Haddii ilmuhu weli baahi u qabo daryeel waxaa meel geyntan u sii socon kartaa si ikhtiyaari ah iyadoo leh taageerada sharciga arrimaha bulshada (2001:453), SoL. Qodobka salka u ah waa in ilmuhu dib ula midoobo waalidkiisa sida ugu dhakhso

badan marka hadafka daryeelkan la gaaro. Meel geyntu maaha inay socoto wakhti ka dheer inta ah lagama maarmaanka.

Haddii ay jirto khatar muuqata oo ah in caafimaadka ama horumarka ilmaha uu dhaawacmayo haddii isaga ama iyadu ka guuraan guri qoyska haya markaas adeegga arrimaha bulshada ayaa go'aamin kara in ilmuhu aan guurin. Go'aan noocaas ah waxaa la qaataa iyadoo mar walba la tixgelinayo wax u fiican ilmaha. Ilmuhu mar walba wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo warbixinta khuseeya oo waa in la siiyo fursada ah inuu soo gudbiyo aragtiyihiisa.

## Miyaa waalidku heli karaan caawimaad si ay u awoodaan in carruurtoodu dib ugu soo laabato guriga?

Adeegga arrimaha bulshada waa inuu xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ee ilmaha iyo waalidka carruur meel la geeyay ay siiyaan talobixin, taageero iyo caawimaada kale ee ay u baahanyihiin. Waxay ahaan kartaa tusaale ahaan in la siiyo tababarka waalidiinta, taageero wada hadal, taageero dhinaca doorka waalidnimo iyo taageero dhinaca xiriirka kuwa daryeela ilmahan.

## Haddii qoys ay muuqatay inay waxyeelo ku ahaayeen hal ilmo, sababtee ayaa carruurta kale ee qoyskan loola wareegi karaa?

Adeegga arrimaha bulshada ayaa mar walba sameeya qiimeynta dhinaca xaalad kasta oo gaar ah, micnihii dhinaca ilmo walba. Haddii ay jirto khatar muuqata oo ah in caafimaadka ama horumarka ilmaha uu dhaawacmayo oo aanu jirin oggolaanshaha daryeel ikhtiyaari ah waa in adeegga arrimaha bulshada go'aamiyaa daryeel waafaqsan LVU. Adeegga arrimaha bulshada maaha inay sugaan inay tallaabo qaadaan ilaa iyo inta ilmo ay waxyeelo soo gaadhayso.

## Anigu ma la kulmin ilmahayga dhowr sano. Miyaa adeegga arrimaha bulshada ay go'aamin karaan sidaas?

Adegga arrimaha bulshada mas'uuliyad ayaa ka saaran in baahida ilmaha ee la kulanka waalidka iyo dadka haysta mas'uuliyadda sharci ee ilmaha laga haqabtiro ilaa iyo inta ugu badan ee ay taasi suurtagal tahay. Laakiin haddii ay lagama maarmaan tahay marka laga eego dhinaca xaaladda markaas adeegga arrimaha bulshada waxay go'aaminayaan in la kulanka la xadeeyo. Xaaladdo gaar ah qaarkood waxaa adeegga arrimaha bulshada xitaa u baahan karaan in magaalada ilmuhu joogo ay ka qarsoonaato waalidka iyo dadka haysta mas'uuliyadda sharci ee ilmaha.